
## Year 1 Phonics Screening Check

Information for parents and carers

# Hubinta Codka xarfaha ee Fasalka 1aad

Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta




## Waa maxay codka xarfuhu?

Codka xarfuhu waa xiriirka u dhaxeeya xarfaha iyo codadka waana u muhiim barashada wax akhriska. Carruurta qaarkood waxay dhib ka maraan barashada wax akhriska, sidaa daraadeed waa muhiim in carruurtan si dhakhsa ah loo ogaado. Sidaan, macalimiintu waxay qoyshayn karaan wixii taageero gaar ah ee laga yaabo inay u baahan yihiin.

### Waa maxay hubinta codadka xarfaha ee Fasalka 1aad?

Hubinta Coddadka xarfaha ee Fasalka 1aad  waa qiimeyn kooban oo ah gobolka oo dhan ah oo u sheegaysa macalimiinta sida ilmahaagu ugu horumarayo codadka xarfaha. Hubintan codadka xarfaha waxay eegaysaa siduu u akhrinayo ilmuhu xarfaha Ingiriiska ee leh erayo badan oo laysu geeyey. Ilmahaagu wuxuu la fariisan doonaa macalinka waxaana la weydiin doonaa inuu kor u akhriyo 40 eray. Erayadan waxaa ku jira 20 eray oo dhab ah iyo 20 eray oo aan micno lahayn. Ujeeddada eraya aan micnaha lahayn waxaa weeye waa in la arko in ardaydu ay isticmaali karaan aqoontooda ee isku qaska ee inuu akhriyo eray meeshii uu isticmaali lahaa xasuustiisa ah inuu hore u arkay eraygaas. Imtixaanku wuxuu caadi ahaan qaataa 5-7 daqiiqo. Haddii ilmahaagu uu ku dhibtoonayo macalinku wuxuu joojinayaa imtixaanka hubinta ah. Hubinta waxaa loo sameeyey si taxadar leh si aysan u noqon mid welwel badan ku keenta ilamahaaga.

Ujeedada ugu weyn ee Hubinta Coddadka erayada ee Fasalka 1aad waa in la siiyo macalinka ilmahaaga macluumaad u ogolaan doona iyaga qorshaynta waxbarashada ilmahaaga. Ilma kasta si shakhsi ahaan ah ayuu u qiimeynayaa macalinku oo dhamaan ardayda Fasalka 1aadna waa la qiimeynayaa.

### Waa maxay sababta coddadka erayadu ay muhiimka u yihiin?

Aqoonta coddadka erayada iyo xirfadu waxay muhiim u tahay wax ku barashada akhriska iyo qoraalka oo Ingiriis ah. Si ay u guuleystaan, ardaydu waxay u baahan yihiin inay bartaan coddadka ay metelayaan xarfo gaar ahaaneed ama xarfo kala duwan oo laysu geeyey, xirfada isku wada qaska coddadkan si loo akhriyo erayo. Akhriyayaasha bilowga ahi waxay u baahan yihiin inay si dhakhsa ah oo sahlan u bartaan sidii ay isugu wada qasi lahaayeen erayada, si aysan u carqaladeyn sida akhriska iyo fahamkooda qoraalku ay u socdaan.

Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan Hubinta Dhawaaqa Xarfaha Fasalka 1aad.

### Adeega turjubaanka taleefanka

Haddii aad u baahan tahay caawimaad turjubaan la xiriir dugsiga, fadlan wac 131 450, u sheeg xiriiriyaha luuqadaad rabtid oo u sheeg inay dugsiga wacaan. Xiriiriyaha ayaa khadka soo gelin doona turjubaan si uu kaaga caawiyo wada hadalkaaga. Adeegan waxba lagaama qaadi doono.